

Qorshaha Jawaabta Dhaqaalaha COVID-19 Canada - Soo Koobidda Manaafacaadka Maaliyadda¹

Noocyada Kaalmada	Sharaxaad kooban oo ku saabsan Kaalmada	Xisaabta Kaalmada	Maxaan samayn karaa Aniga si aan u helo kaalmada?	Macluumaad dheeraad ah
Jawaabta Degdegga Canada (Canada Emergency Response) Manaafacaadka (CERB)	<p>Manaafacaadkaan la canshuuri karo waxaa lagu siin doonaa \$2000 bil kasta ilaa muddo afar bil marka shaqaalaha lumiyaan dakhligooda taasoo ugu wacan cudurka faafa ee COVID-19.</p> <p>CERB waxay kharashka siin doontaa:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Shaqaalaha ay waajibka ku tahay in ay joojiyaan shaqada taasoo ugu wacan COVID-19 marka aan la siin karin mushaar inta ay shaqada ka maqan yahiin (paid leave) ama aan heli karin dakhli kale. • Shaqaalaha xanuunsan, la karantiilay, ama daryeela qof qaaday cudurka COVID-19. • Waalidiinta shaqeeya ay waajibka ku tahay in ay joogaan guriga mushaar la'aan si ay u daryeelaan caruur xanuunsan ama u baahan daryeel dheeraad ah maxaa yeelay waxaa la xeray dugsiga ama daryeelka maalinimada. • Shaqaalaha weli shaqeeya balse aan la siinin mushaar yeelay iminka ma 	\$2000/bil kasta	<p>Manaafacaadka Jawaabta Degdegga Canada (Canada Emergency Response Benefit) waxaa lagala xariiri karaa internet sugan horaanta bisha Abriil.</p>	<p>Riix halkaan si aad u heshid macluumaad badan.</p>

¹ * These financial supports are provided by the federal government at this moment and kindly check Canadian government's website for the latest announcements. For other supports offered by provincial and municipal governments, check the media outlets of your particular province or city.

* This info is adopted from a list compiled by habesha.help@gmail.com; <https://ethioerisupport.webnode.com/>

	<p>jirto shaqo ku filan iyo loo-shaqeeyaha ayaa ka codsaday in aysan imaanin shaqada.</p> <ul style="list-style-type: none"> Dadka qaata mushaar iyo kuwa iskooda u shaqeysto, sida shaqaalaha ku shaqeeyo heshiis, aan si kale xaq yeelan karin Ceymiska Shaqada (Employment Insurance). 			
Kaalmada Deynta Guriga	<p>Bangiyada Canada waxay ballan qaadeen in ay la shaqeyaan macaamiishooda taasoo ku saleysan hadba sida u yahay kiiska si ay u helaan xal oo iyaga ku kaalmeeya in ay maamulaan dhibaataada uu sababta u yahay COVID-19. Dadka Canada uu saameyay COVID-19 soona gaartay dhibaato xagga maaliyadda waa in ay la xariiraan hay'adooda maaliyadda si gadaal loogu dhigo deynta guriga. Tan waxay dabacsanaan siin doontaa kuwa u baahan.</p>	<p>Taasoo ku xeran xisaabta deynta</p>	<p>La xariir bangigaaga deynta guriga</p>	<p>Riix halkaan si aad u heshid macluumaad badan.</p>
Kordhinta Manaafacaadka La Siiyo Cunugga Canada	<p>Dawladda Canada waxay cunug kasta siin doontaa \$300, waxaana laga siin doonaa Manaafacaadka Cunugga Canada (Canada Child Benefit) (CCB) sannadka 2019-20. Tan macnaheeda waxay tahay in qoyska caadiga uu qiyaas ahaan heli doono \$550 dheeraad ah. Manaafacaadkaan waxaa la soo gaarsiin doonaa bisha Maajo, waxayna qeyb ka tahay lacagta CCB.</p>	<p>\$300 dheeraad ah halkii cunug \$550 dheeraad ah oo la siin doono qoyska caadiga</p>	<p>Qoysaska iminka qaata Manaafacaadka Cunugga Canada (Canada Child Benefit) uma baahna in ay soo dalbadaan. Waxaad filan kartaa in aad heshid lacagta dheeraadka ah bisha Maajo.</p>	<p>Riix halkaan si aad u heshid macluumaad badan.</p>
Joojinta dib u bixinta Deynta Ardayga Canada (Canada Student	<p>Laga bilaabo Maarso 30, dawladda Canada waxay muddo lex bil dul-saar ka dhaaftay dib u bixinta Deynta Ardayga Canada (Canada Student Loan) ee dhamaan deynta ay qaateen ardayda.</p>	<p>Taasoo ku xeran xisaabta deynta</p>	<p>Ma u baahnid in aad wax samaysid si aad u heshid kaalmo. Waxaad joojin kartaa</p>	<p>Riix halkaan si aad u heshid macluumaad badan.</p>

Loans)	Looma baahna in aad lacag bixisid mana laguugu soo dallici doono dul saar waqtigaan.		in aad bixisid muddo lex bil laga bilaabo Maarso 30.	
Lacag bixinta deynta Adeeyada Canshuurta iyo Badeecada Khaaska (Special Goods and Services)	Dawladda Canada waxay bixin doontaa lacagta hal mar, horaanta Maajo, waxayna ka bixin doontaa deynta Canshuurta Adeegyada iyo Badeecada (Goods ana Services Tax) ee la siiyo qoysaska dakhliga hoose iyo kuwa dakhligoada iska yar yahay.	Ku dhawaad \$400 qofka keligii ah iyo ku dhawaad \$600 labada qof.	Ma jirto baahi loo qabo in aad dalbatid lacagtaan. Haddii aad xaq u yeelatid, toos ayaad u heli doontaa.	Riix halkaan si aad u heshid macluumaad badan.
Waqti dheeraad ah oo lagu gudbiyo canshuur celinta dakhliga	Dawladda Canada waxay gadaal u dhigtay taariikhda leyska rabo in la soo gudbiyo canshuur celinta 2019 ee qofka keligii ah. Qofka keligii ah (marka laga reebo ammaanada), taariikhda leyska rabo in la soo gudbiyo canshuur celinta waxaa gadaal loo dhigay ilaa Juun 1, 2020. Waxay kaloo ogolaan doontaa in baaqiga canshuurta dakhliga cusub ee leyska rabo, ama loo bixiyo kis-kis, in gadaal loo dhigo ilaa laga gaaro Agoosto 31, 2020 laguna soo dallicin dul-saar ama ganaax.		Waajib kuguma aha in aad wax samaysid si aad u dalbatid	Riix halkaan si aad u heshid macluumaad badan.